



Ardayda dugsiiga sare ee 9 PPS ayaa u qoray heeso barnaamij khaas ah oo loogu tala galay Smithsonian

Qoraayaasha rajada buuxda leh ayey ku adkaan kartaa in ay helaan mowduucyo ay wax ka qoraan, laakiin sagaal arday oo dhigta dugsiiga sare kana socday Dugsiyada Dadweynaha ee Portland ayaa la siiyey fursad aan iyadoo kale la arag taasoo ahayd labada dactal ee iska soo horjeeda. Waxay galaan gal u heleen waxyaalo la adeegsado oo uu leeyahay madxafka ugu balaaran caalamka, waxbarashada iyo cilmi baarista aadka u adag taasi oo dusha loo rito tijaabinta in la qoro heeso.

Barnaamijka waxaa lagu magacaabay “Hees qorista dhamayska tiran ee da’yarta” waxaana la isugu keenay habka waxwada fulinta u dhexeeyey waaxda [CTE \(career and technical education\) ee degmada](#) iyo [N.M. Bodecker Foundation](#) dagmada, iyadoo ay ku jiraan dhaqanka aynu dhaxalka u leenahay ee [Smithsonian Institution](#). Ardayda waxaa u soo xulay barmaamijka macalimiintooda, la taliyayaasha iyo isku xirayaasha xirfadaha.

“Waxay baareen, qoreen oo ay duubeen saddex heesood oo kusalaysan dukuminti si furan loo siiyey oo laga keenay Smithsonian, “ ayaa waxaa yiri Chris Funk, xubin ka tirsan kooxda Portland disembarists iyo agaasimaha hal abuurka ee Mu’asasada Bodecker .

Ardayda kuwaasi oo ka qaybgalay waxay kala ahaayeen:

- Alyssia Menezes, dugsiiga Lincoln
- Calvin Sewell, dugsiiga Wilson
- Claire “Rumi” Chapiro-Luboff, dugsiiga Wilson
- Demian “Forest” Shaw, dugsiiga Alliance at Meek
- Eli Pearl, dugsiiga Grant
- Joneyo “Jolly Wrapper” Prom, dugsiiga Jefferson
- Lucas Murray, dugsiiga Wilson
- Sirena Miranda, dugsiiga Grant
- Tracy Jones, dugsiiga Wilson

Ardayda waxaa la shaqeeyey toddoba farshaxaniiste oo tababarayey, waxaana ka mid ahaa Funk iyo Zach Carothers iyo John Gourley ee kooxda kale ee Portland, dalka boortaqiiska. Waxay awoodeen inay adeegsadaan farshaxanka gobolka goobta wax lagu duubo ee Halfling oo ay ku yaalaan xafiisyada Bodecker woqooyigalbeed Portland.

“Kaliya in aad joogto goobtan wax lagu duubo waa midku farxadgalinaysa,” waxaa tiri Sirena. “Ma ahan wax aan la qabsaday.”

Smithsonian, ayadoo la sii dhaxmarayo barnaamijkeeda Galidda Furan, ayaa samaysay ku dhowaad 3 malyan oo waxyaalood oo la heli karo iyagoo duuban lagana dhex heli karo xadiga aadka u badan ee ay ururiyeen, ahna khasnad aad u wayn oo ah kayd farxad leh ardayduna ay ku shaqayn karaan.

“Macluumaad la’aan, ma jiro wax kobcinaya waxa aan curinaayo,” waxaa tiri Joneyo, taasi oo duubtay dhawr heesood iyadoo sidata magaca Jolly Wrapper.

Ururka Bodecker ee ka dhisan Portland, sida ku jirtay erayada Funk, “wuxuu awood siinayaa dhalinta hal abuurka leh si ay u suuraystaan ayna u gaaraan farshaxanyahanimadooda, riyadooda waxbarasho iyo tooda xirfadeed.

Sadexda heesood ee ardaydu ay qoreen waxaa laga dhagaysan karaa bogga SoundCloud ee xarunta wax lagu duubo ee Halfling ([the Halfling Studio’s SoundCloud page](#)). Jolly Wrapper ayaa qaaday heesta uu isagu la qoray Calvin iyo Forest, “Flipsonian” xafadi ka dhacday xarunta Smithsonian bishi Febraayo magaalada Washington, D.C., si loogu billabo barnaamijka Gelitaanka Furan ee waxtarkaleh.

- [Daawo bandhiga Jolly ee Washington, D.C.](#)
- [Daawo viidhiyaha Smithsonian heesqorista waxtarka leh ee da’yarta](#)